# Washington State Department of Health waxay hadda Dhammaanba Dugsiyada Sare ee Dowliga ah Siinaysaa Agabka Naloxone oo Bilaash ah

## Dugsiyada Sare ee Dowliga ah, Dugsiyada Sare ee Badalka ah, iyo Adeegyada Gaarka ah ee u Adeega Fasalada 9-12 waxay Naloxone ka dalban karaan Degmooyinka Adeegyada Wxabarashada (ESDs)

Intii u dhexaysay 2016 ilaa 2022, waxaa jiray digniino kordhaya oo ku saabsan dhimashada la xiriirta iska badinta maandooriyaha opioid ka gudaha Washington, khaasatan dadka dhallinyarada ah.Heerka dhimashada la xiriirta opioid ku waxay in ka badan laba jibaara korortay mudadaan, marka la tixraaco State Unintentional Drug Overdose Reporting System (Nidaamka Warbixinta Iska badinta Maandooriyaha Aan ulakaca ahayn ee Gobolka). Kororkaan waxaa loo tiirinayaa fara badnanshaha opioid ka la farsameeyo, sida fentanyl, oo la socda helitaanka daawada ee sharcidarrada ah.

**Ayada oo ka jawaabaysa, Washigton State Department of Health (DOH, Waaxda Caafimaadka ee Washington) waxay siinaysaa Naloxane bilaash ah dhammaanba dugsiyada sare ee dowliga ah, dugsiyada sare ee badalka ah, iyo barnaamijyada gaarka ah ee u shaqeeya ardayda dugsiga sare (sida, albaabada furan) gobolka oo dhan.** Naloxone (sidoo kale loo yaqaano magaca shirkadeed Narcan®) waa daawo aan waxyeelo lahayn oo waxtar ah taasoo si kumeelgaar ah meesha uga saaraysa saamaynta timaadda marka opioid ka la iska badiyo, oo kamid tahay marka la iska badiyo fentanyl. Sharciga Washington (oo ku qoran Ingiriisi) wuxuu dugsiyada degmooyinka ee haysta arday 2,000 ama ka badan ah ku waajibinayaa inay haystaan ugu yaraan hal kuuro oo daawada meesha ka saarta saamaynta opioid ah (sida, naloxone) mid kasta oo dugsiyadooda sare kamid ah.

Dhacdooyinka iska badinta maandooriyaha inta dugsiga la joogo waa dhif iyo naadir. Wali, u diyaargaroowga garashada iyo ka jawaabista iska badinta daawadu waxay muhiim u tahay sida ay muhiimka u tahay u diyaargarowga xaaladaha kale ee degdega ah. Inaad dugsigaaga naloxone usii dalbataa waa qaab aad sare ugu qaadi karto badqabka kuna yarayn karto saamaynta ka dhalata iska badinta opioid ka ee bulshadaada dhexdeeda.

Hindisahaan cusub wuxuu waafaqsan yahay waraaqdii u danbaysay (oo ku qoran Ingiriisi) ee ka timid U.S. Department of Education (Waaxda Waxbarashada Mareykanka) iyo White House drug policy office (xaafiiska siyaasadda maandooriyaha ee Aqalka Cad) taasoo ku boorinaysa dugsiyada inay diyaarsadaan naloxone kuna tababaraab shaqaalaha iyo ardayda sida loo isticmaalo. Barnaamijkeenu wuxuu adeegsadaa qaab guulaystay oo laga dhex dhisay DOH iyo ESDs si uu baaritaanada COVID-19 ugu qaybiyo dugsiyada. Hindisahaan waxaa lagu suurtagaliyay kaliya iskaashi u dhexeeya DOH, Washington State Office of Superintendent of Public Instruction (OSPI, Xaafiiska Kormeerka Waxbarashada Bulshada ee Gobolka Washington), iyo ESDs ku yaala gabi ahaanba Washington.

## Sida Naloxone loogu Dalbado Dugsigaaga

Dhammaanba dugsiyada sare ee dowliga ah, dugsiyada sare ee badalka ah, iyo barnaamijyada gaarka ah ayaa codsan kara laba xirmo oo naloxone ta la isku buufiyo ah (oo ay kujiraan laba kuuro halkii xirmaba) oo lagu siinayo ESD gooda. Naloxone waxay taageeri doontaa ka jawaabista iska badinta opioid ka suurtagalka ah ee dugsiyada inta ay socdaan howlaha dugsigu.

Dalabkaanu waa mutadawacnimo. Majiro ESD, dugsi degmada ama dugsi ay waajib ku tahay inuu ka qaybqaato. Dadaalkaanu waa sii dhammaystir, ma ahan badelaad,, dadaal horey u jiray oo la xiriira naloxone ta dugsiyada laga bixiyo.

**Dugsiyada sare ee dowliga ah, dugsiyada sare ee badalka ah, iyo barnaamijyada gaarka ah ee u shaqeeya ardayda dugsiga sare:** Ka dalbo laba agab oo naloxone ah Degmadaada Adeegyada Waxbarashada (ESDs-in Ingiriisi). Waxay noqon doontaa halka aad kala xiriirayso qaybinteeda, oo ay kujiraan dalabkaaga koowaad iyo dib u dalbashada.

**Dugsiyada gaarka loo leeyahay iyo dugsiyo kasta oo raadinaya kuurooyinka naloxone oo dheeraad ah:** Ayada oo barnaamijkaanu u shaqeeyo dugsiyada sare ee dowladda iyo dugsiyada badalka ah, ilaha kale ayaa kaa caawin kara inaad dugsigaaga ka hesho naloxone.

- Dugsiyada iyo maktabaduhu waxay codsan kara Narcan® (hal nooc oo buufin ah) oo ay ka dalbanayaan Narcan Community Donation Program (Barnaamijka Bulshada Narcan) (oo ku qoran Ingiriisi) waxaa maamula Direct Relief and Emergent Biosolutions.
- Narcan waxaa hadda laga heli karaa in laga iibsado suuqa iyo farmashi kasta oo tafaariiq le ah (sida, Walgreens, CVS, Rite Aid). Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan naloxone ta suuqa laga iibsado, fadlan bookho Su'aalaha Inta badan La iska weydiiyo Naloxone) (luuqado kale ayaa diyaar ku ah).
- Si aad si toos ah Narcan uga iibsato farsameeyaha, bookho NARCANDirect.com (oo ku qoran Ingiriisi). Dugsiyadu waxay xaq u yeelan karaan inay si toos ah uga soo iibsadaan Narcan Sanka la iskaga Buufiyo Emergent Devices oo ay ku helayaan qiimaha bulshada u wanaagsan (oo hadda ah $41/xirmo laba kuuro kujirto).
- Ururadu waxay sidoo kale awoodi karaan inay naloxone ka soo iibsadaan bixiyeyaasha daawooyinka, sida Cardinal Health iyo McKesson (oo ku qoran Ingiriisi).

## Sida loo Isticmaalo Naloxone

Bookho webseedka Centers for Disease Control and Prevention (CDC, Xarumaha Kahortaga iyo Xakameynta Cudurada) (luuqado kale ayaa laga heli karaa) si aad u hesho tilmaamo qoraal iyo muuqaal iskugu jira oo ku saabsan sida loo isticmaalo naloxone.

## Wixii la xariira Macluumaad Dheeraad ah

**Ma qabtaa Su'aalo Ku saabsan Barnaamijka?** La xiriir ESDkaaga (oo ku qoran Ingiriisi).

**Ma qabtaa su'aalo ku saabsan qaabka loo isticmaalo naloxone ama loo kaydsado?** La xiriir ESD kaaga ama OSPI, ama ka tixraac Webseedka Jooji Iska badinta Mandooriyaha (luuqado kaloo dheeraad ah).

**Ma qabtaa su'aalo ku saabsan qaabka loo soo celiyo naloxone dhacday?** La xiriir ESD kaaga ama naloxoneprogram@doh.wa.gov.

**Ma qabtaa su'aalo badan ama faalooyin ku saabsan shaqooyinka DOH?** Kala xiriir DOH k12engagement@doh.wa.gov.

## Ilaha Dheeraadka ah ee Dugsiyada

Sharciga Caafimaadka Gudaha iyo School Nurse Corps (Barnaamijka Kalkaalinta Ardayda) (luuqado kale oo dheeraad ah ayaa la heli karaa) ayaa kaa caawin kara qaababka kale oo aad ku heli karto naloxone.

Dukumiintiga ilaha OSPI (oo ku qoran Ingiriisi) waxaa kujira macluumaad ku saabsan tababarada dugsiyada loogu talagalay ee ku saabsan iska badinta opioid ka.

Si lagaaga caawiyo kala hadlista warbaahinta naloxone ta dugsiyada, tixraac Qodobada Muhiimka ah ee Warbaahinta ee Noloxone ta Dugsiyada Sare.

Si lagaaga caawiyo kala hadlista qoysaska naloxone ta dugsiyada, tixraac Agabyadeena Waxbarashada Naloxone ta Qoysaska. Arrintaan waxaa loo diri karaa qoysaska sida ay tahay ama waxay noqon kartaa bar bilowga xiriirkaaga.

Ka Hortagga Iska badinta Maandooriyaha WA (oo ku qoran Ingiriisi iyo Spanish) olaolaha waxaa kujira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida looga hortago iska badinta maandooriyaha.

DOH 150-243 January 2024 Somali